



Huomaa hyvä![®]

Guuleysasho kasta waxay u qalantaa in loo xafladeeyo – Vahvuusvaris ayaa deyrta baraya 4 000 oo ardayda fasalka koowaad ee Espoo ah in ay awooddooda aqoonsadaan

Magaalada Espoo waxay ardayda deyrta billaabaysa fasalka koowaad iyo waalidiintooda u fidinaysaa taageerada aqoonsashada awoodda carruurta. Garo wanaagga! (Huomaa hyvä!) -soo-celinta baakadda farxadda ee ku salaysan taxanuhu waa mid ay shirkad lagu magacaabo Positive Learning guud ahaan ugu talaggashay dugsiyada Espoo, ardayda iyo qoysaskooda. Hawshan wada dhan ee loogu talagalay ardayda fasalka koowaad waa qayb kamid ah hadafyada barnaamijka horumarinta ee Hyvinvoiva Espoo oo lagu xoojinayo nololwanaagga qalbiga reer Espoo.

Ablikeeshinka iyo waxbarahaduba waxay qoyska oo dhan ka caawinayaan in ay maalin kasta ogaadaan waxa wanaagsan.

Baakadda soo-celinta farxaddu waxay ka kooban tahay lix webinaar oo khadka internetka ah oo waalidiinta loogu talagalay, kuwaas oo ku baxaya af finnish, iswiidhish iyo ingiriis. Webinaaradu waxay furayaan gunta barbaarinta boosatiifka ah: waayo-aragnimada guuleysashada yar xittaa waa mid u qalanto ogaal waxayna kordhinaysaa isku kalsoonaanta, taas oo awooddeeda uu cunuggu xoogga ku saarayo guuleysashada xigta.

Waxaa kale oo ay waalidku helayaaan ablikeeshinka Huomaa hyvä oo ay telefoonka ama kambuyuutarka ku isticmaalayaan. **Tilmaamaha billaabista isticmaalka ablikeeshinka waxaa lagu qaybinayaa webinaarada iyo farriimo Wilmada lagu soo diro.**

Adeegga dijitaalka ee ku salaysan baaritaanka barbaarineed wuxuu bixinayaa macluumaad ku saabsan xoogga dabeecadda iyo taageeriddeeda. Xoogga dabeecaddu waa tusaale ahaan dareen la qaybsiga, hal-adaygnimada iyo wardoonnimada. Waxaa la kaalmaysanayaa agabyo la taaban karo, kuwaas oo uu waalidka ku taageeri karo horumarinta awoodaha cunugga. Waxaa kale oo si waafaqsan kalandarka waxbarashada loo siinayaa waxbarashadan bisha Sebtembar macallimiinta ardayda fasalka koowaad.

Waxbarashada goobta ka dhacaysa iyo tan khadka internetka ka dhacaysa ee waalidiinta loogu talaggalay

Waxbarashada tooska ah ee luqadda finnishka ku baxaysa ee waalidka loogu talaggalay waxaa lagu qabanqaabinayaa 25.10.2022, saacadda 18–20 hoolka Otasali ee dugsigaa sare ee Otaniemi (cinwaanka Tietotie 6). Madasha toos ayaa loo istiriimgaraynayaa. Looma baahna in la iska diiwaangeliyo, ku soo dhowow!

Webinaarada (live-online):

- 26.10 18.00 – 19.30, iswiidhish
- 31.10, 18.00 – 19.30, ingiriis
- 1.11, 18.00 – 19.30, finnish
- 2.11. 18.00 – 19.30, finnish
- 3.11, 18.00 – 19.30, finnish

Linkiyada webinaarada waxaa la soo gelinayaa boggan marka uu wakhtigu soo dhowaado: espoo.fi/ilonpalautus.

Hyvinvoiva Espoo waa mid kamid ah afarta barnaamij horumarineed ee Espoo ee muddo xileedka golahan deegaanka. Waxyaabaha barnaamijka lagu horumarinayo waxaa ka mid ah xalka ka soo kabashada wakhtiga Koronaha iyo kahortagga dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka.

#HyvinvoivaEspoo #VälmåendeEsbo #HealthyEspoo

Barbaarinta wanaagsan waxay taageereysaa waxbarashada iyo nololwanaagga.

